

Su'aalaha la jeedinayo

Ka hor inta aadan ka soo bixin ballantaada hubi in aad og tahay waxan soo socda:

Dhibaataada jirta maxay noqon kartaa? Waxaad jeedin kartaa su'aalaha soo socda:

- Ma hubin karaa in aan fahmay waxaad tidhi? Waxaad leedahay waa...
- Miyaad dib iigu macnayn kartaa? Weli ma fahmin.
- Miyaan nuqul ka heli karaa wixii waraaqo ah ee aniga la iga qoro?

Wixii ku saabsanna baaritaannada dheeraadka ah, sida baaritaannada dhiigga, skaannada (sawirista jirka gudhiisa) iyo wixii la mid ah?

- Maxaa baaritaannada loogu baahan yahay?
- Goormeen heli doonaa natiijooyinka sideenan u heli doonaa?
- Yaan la xiriiri karaa haddii aan natiijooyinka heli waayo?

Wixii ku saabsan daawaynta, haddii ay midi jirto, ee adiga kuugu fiican

- Miyay jiraan siyaabo kaloo loo daawayn karo xaaladdayda cudur?
- Maxaad igula talinaysaa?
- Miyay jiraan dhibaatooyin soo raaca ama waxyaabo halis ah?
- Waqti intee leeg ayaan daawaynta u baahan doonaa?
- Sideen ku ogaan doonaa in ay daawayntu waxtarayso?
- Sidee ayay waxtar u leedahay daawayntaasi?
- Maxaa dhici doona haddii aan is daawayn waayoba?
- Ma jiraa wax habboon in aan samayntiisa iska joojiyo ama ka fogaado?
- Ma jiraa wax kaloo aan anigu samayn karo oon isku caawin karo?



Waxa xiga ee dhacaya iyo cidda lala xiriirayo

- Maxaa xiga ee dhacaya? Ma in aan soo noqdaa si aan kuu arko?
- Yaan la xiriiri karaa haddii ay arrimuhu ka daraan?
- Ma haysaa warbixin qoraal ku dhigan?
- Halkeen tagi karaa si aan uga helo warbixin dheeraad ah, urur taageero ama caawimo dheeraad ah?

Fikradaha ugu fiican



Ballaantaada Ka hor



- Qoraal ka samayso labada ama saddexda su'aalood ee kuugu muhiimsan.
- Liis ka soo samee ama soo qaad dhammaan daawooyinkaaga iyo kiniinnadaada – xataa fiitamiinnada iyo kiniinnada cunto-qaadashada kordhiya.
- Qoraal ka soo samee faahfaahinta calaamadahaaga cudur, soona sheeg goortii ay bilaabmeen iyo waxa ay ku roonaanayaan ama kaga sii darayaan.
- Isbitaalkaaga ama xafiiska takhtarkaaga weydiiso turjumaan ama taageero xagga wadaxiriirka ah haddii aad u baahato.
- Qof aad saaxiibbo tihin ama xubin qoyskaaga ka mid ah weydiiso in uu ku soo raaco, haddii aad rabto.

Ballantaada gudaheeda

- Ha ka cabsoon in aad weydiiso wixii aad fahmi weydo. Tusaale ahaan, 'Miyaad taas dib ugu celin kartaa? Weli ma fahmin.'
- Haddii aad kalmado fahmi weydo, weydiiso in iyaga meel laguugu qoro oo lagu macneeyo.
- Waxyaabaha lagu yidhaahdo qoraal ka samayso, ama xubin qoyskaaga ka mid ah ama qof aad saaxiibbo tihin weydiiso in uu qoraallo kaaga sameeyo.

Ka hor inta aadan ka soo bixin ballantaada



- **Hubi in aad:**
 - ka hadashay waxwalboo liiskaaga ku jira
 - aad fahantay, tusaale ahaan 'Ma hubin karaa in aan fahmay waxaad tidhi?
 - aad og tahay waxa xiga ee dhacaya – iyo waqtiga uu kaasi dhacayo. Qoraal ka samayso.
- **Weydiiso:**
 - cidda aad la xiriiri karto haddii aad qabto dhibaatooyin ama su'aalooyin dheeraad ah
 - ururrada taageerada iyo halka aad u doonan karto warbixin laku kalsoonaan karo, iyo
 - nuqullada waraaqaha adiga lagaa qoro – xaq ayaad u leedahay in aad kuwaas aragto.

Ballantaada ka dib, ha illaawin waxan soo socda



- Qoraal ka samayso waxa aad ka wadahasheen iyo waxa xiga ee dhacaya. Qoraalladaada hayso.
- Diyaarso wixii baaritaanno ah ee aad karayso taariikhahoodana ku qoro buuggaaga ballamaha.
- **Weydii:**
 - 'maxaa dhacaya haddii la ii soo diri waayo faahfaahinta ballaantayda,' iyo
 - 'miyaan heli karaa natiijooyinka baaritaan kaste?' (Haddii aad natiijooyinka heli weydo goorta aad filanayso – weydiiso in iyaga lagu siiyo.) Weydii waxa ay natiijooyinku ka dhigan yihiin.